**GOLAHA SHACABKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BJFS July 9, 2024**

**Ujeeddo: Soo-jeedin (Motion) Qaraarka ku Saabsan Ilaalinta iyo Ka Hortaga Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta ah in Dhulka (Dab Damiska, Qabuuraha iyo Dhulalka Kale) Ay Degan Yihiin Loo Bixin Si Sharci-darrada ah**

Mudane Godoomiye,

Mudane Guddoomiye ugu horeyn naga gudoon Salaan qiimo badan.

Anagoo ah Xildhibaanadda Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya ee Magacyadooda iyo Saxeexoodu ku lifaaqan yahay, waxaan si xushmad iyo qadarinba leh kuugu soo gudbinaynaa soo jeedin (Motion) isaga oo noo ogolaanayo **Heer Hoosaadka Qodobka 74aad Farqada (3)(b) Golaha Shacabka in uu Xildhibanada Golaha Shacabku Soo-jeedin hindise-sharciyeed ama qaraar.**

**Markaan Aragney,** Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta ah ee Xamar Degan ay la kulmeen bixinta dhulkii hoyga (**Dab Dambiska iyo Dhul Kale**) u ahaa iyo **Qabuuraha** si sharci-darrada ah iyo barakicin iyadoo aan loo eegin xuquuqdooda iyo shuruucda dalka;

**Markaan Aragney,** in Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya ay ka go'an tahay ilaalinta karaamada bini'aadamka, sinnaanta, iyo xuquuqaha aasaasiga ah ee muwaadiniinteeda sida ku cad Dastuurka;

**Markaan Aragney, Qodobbada 10, 11, 12, 15, 19, 20, 26, 32, 33, 34, 39, iyo 40 ee Dastuurka** Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay farayaan

ilaalinta karaamada bini’aadamka, sinnaanta, xorriyadda, ammaanka, ilaalinta hoyga, xuquuqda hantida, iyo helitaanka cadaaladda;

**Haddaba,** Anaga oo ah Xildhibaanada Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya ku saxeexan motion kani goaansanay in motionkani aan keeno anagoo ku dejiyana qodobbada soo socda si loo ilaaliyo xuquuqda barakacayaasha  iyo shavabka danyarta ah oo loo hubiyo in laga ilaaliyo bixinta sharci-darrada ah dulka danta guud ee hada degan yihiin iyo qabuuraha:

## Qodobka 1: Fasiraadaha

1. **Barakacayaasha:** Dadka ama kooxaha dad ah ee lagu qasbay ama loo baahiyay inay ka cararaan ama ka tagaan guryahooda ama meelihii ay degganaayeen sababo la xiriira khilaaf, rabshad, ku xadgudubyo xuquuqda aadanaha, ama musiibooyinka dabiiciga ah ama kuwa bini’aadamku sameeyay.
2. **Shacabka Danyarta:** Dadka ama kooxaha dad ah oo sabool ah oo aan haysan dakhli ka badan ay naftooda nolol maalmeed u helaan amba haysan taageero ay reerkooga nolol maalmeedka ugu helaan.
3. **Bixinta Sharci-darrada ah:** Bixinta aan la raacin nidaamyada iyo ilaalinta lagu dejiyay sharciga, oo ay ku jiraan bixinta aan la marin habraaca saxda ah, iyada oo aan la siin ogeysiis ku filan, iyo iyada oo aan la siin guri kale ama magdhow.

## Qodobka 2: Ilaalinta Ka Hortaga Bixinta Dhul Danta Guud si Sharci-darrada ah

**1. Mamnucidda Bixinta Sharci-darrada ah Dhulka:**

- ✓ Dhamaan noocyada bixinta sharci-darrada ah Dhulka ay degan yihiin Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo qabuuraha waa la mamnuucay, maalinta sharcigan uu ansaxiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.
- ✓ Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo Maydka lagama bixin karo isaga oo aan laheyn sabab sax ah oo sharci ah, iyo iyada oo aan la raacin habraaca ku cad mooshinkan.

**2. Shuruudaha Habraaca Saxda ah:**

- ✓ Bixinta Barakacayaasha iyo Danyarta amba Maydka kasta waa in ay ka horreeyso dib u eegis garsoor oo dhameystiran iyo amar sababeed ka soo baxa garsooraha, sida uu farayo **Qodobka 19 ee Dastuurka**.
- ✓ Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo Maydka ay saameysay waa in la siiyo ogeysiis ku filan oo macquul ah oo ku saabsan bixinta.

- ✓ Barakacayaasha waa in la siiyo fursad ay ku cabiraan bixinta maxkamad awood leh, sida ku cad **Qodobka 34 ee Dastuurka**.

3. **Bixinta Guri/Dhul Kale iyo Qabuuraha:**

- ✓ Dowladda waa in ay hubisaa in guri/dhul kale iyo Qabuuraha la siiyo Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta la doonayo in la bixiyo. Gurigaas/Dhulkaasi waa in uu ahaado mid nabad ah, la degganaan karo, oo ku yaala meel u oggolaanaysa sii wadashada fursadaha nololeed, waxbarashada, iyo daryeelka caafimaadka. Sidoo kale Maydka soo saarka, aasida iyo dhulka lagu aasayo aay dhamaan bixisaa Dawlada Federalka ee Soomaaliya.
- ✓ Xaaladaha aan guri/dhul kale deg-deg ah lagu heli karin, dowladda waa in ay siisaa magdhow sax ah dadka la bixiyay, sida uu farayo **Qodobka 26(2) ee Dastuurka**.

## Qodobka 3: Hirgelinta iyo Mas'uuliyadda

1. **Kormeerka iyo Warbixinta:**

- ✓ **Wasaaradda Xuquuqda Aadanaha iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha** waa in ay sameeyaan guddi u heellan kormeerka iyo warbixinta xaaladda Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo dhacdooyinka dhulka bixinta sharci-darrada ah. Sidoo Kale aasida Maydka.
- ✓ Warbixin sanadle ah waa in loo gudbiyaa Baarlamaanka taas oo faahfaahinaysa tirada bixinta, sharci ahaanshaha bixintaas, iyo tallaabooyinka la qaaday si loo ilaaliyo Barakacayaasha iyo shacabka danyarta.

2. **Caawinta Sharciga iyo Taageerada:**

- ✓ Dowladda waa in ay bixisaa caawimaad sharci oo bilaash ah Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta la kulmaya bixinta dhulka amba maydka, si ay u difaacaan xuquuqdooda maxkamadda, sida uu farayo **Qodobka 34(5) ee Dastuurka**.
- ✓ Ururada caawimaada sharciga iyo kooxaha xuquuqda aadanaha waa in loo fasaxaa in ay matalaan Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta maxkamadda oo ay raadiyaan magdhow ku saabsan ku xadgudubyada xuquuqdooda.

3. **Ciqaabta kuwa ku xadgudba:**

- ✓ Sarkaal dowladeed ama hay'ad gaar ah oo lagu helo in uu ku lug leeyahay bixinta sharci-darrada dhulka ah waa in lagu qaadaa tallaabooyin **ciqaabeed, oo ay ku jiraan hakinta, eryidda, ama dacwad ciqaabeed.**

- ✓ **Ganacsatada ama dhinacyada** kale ee gaarka ah ee si sharci-darro ah ku helay hanti dhulka ay degganaayeen Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta amba Qabuuraha waa in ay **soo celiyaan hantidaas oo ay wajahayaan ciqaabo, oo ay ku jiraan ganaaxyo iyo xabsi**.

## Qodobka 4: Ka Qaybgalka Bulshada iyo Taageerada

### 1. Wacyigelinta iyo Waxbarashada:

- ✓ Dowladda waa in ay hirgelisaa ololeyaal wacyigelin ah si ay Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo Eheladi Maydka ugu baraan xuquuqdooda iyo ilaalinta sharciga ay leeyihiin.
- ✓ Bulshooyinka maxalliga ah waa in lagu soo daro ololeyaashan si loo xoojiyo fahamka iyo taageerada xuquuqda iyo karaamada Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo Eheladi Maydka.

### 2. Habraaca Cabashada:

- ✓ Habraacyo cabasho oo la heli karo oo waxtar leh waa in la sameeyaa si Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo Eheladi Maydka ay u soo sheegaan ku xadgudubyada xuquuqdooda oo ay u helaan magdhow waqtigeeda ku habboon.
- ✓ Dowladda waa in ay hubisaa in habraacyadan ay yihiin kuwo madaxbanaan, cadaalad ah, oo awood u leh in ay bixiyaan caddaalad.

## Qodobka 5: Fasiraadda iyo Waafaqsanaanta

### 1. Fasiraadda Xuquuqda:

- ✓ Maxkamadaha waa in ay fasiiraan xuquuqda ku cad mooshinkan si loo gaaro ujeeddooyinka xuquuqda iyo qiyamka hoos yimaada, sida ku cad **Qodobka 40 ee Dastuurka**.

### 2. Waafaqsanaanta Shareecada iyo Sharciga Caalamiga ah:

- ✓ Hirgelinta iyo fasiraadda mooshinkan waa in ay waafaqsanaadaan **Shareecada, heerarka xuquuqda aadanaha caalamiga ah, iyo Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**.

Xildhibaanada Saxeexay Motion kani ee Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya waxay mar kale xaqiijinayaan ka go'naanshaha ilaalinta xuquuqda iyo karaamada dhammaan muwaadiniinta, oo ay ku jiraan barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo Eheladi Maydka. Mooshinkan wuxuu doonayaa in la hubiyo in Barakacayaasha iyo Shacabka Danyarta iyo Eheladi Maydka laga ilaaliyo bixinta sharci-darrada dhulka hada degan yihiin lana siinayo taageero iyo ilaalin ku habboon sida waafaqsan Dastuurka iyo heerarka xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah.

Mahadsanid

**LIISKA XILDHIBAANADA SAXEEXAY Soo-jeedin (Motion) Qaraarka ku Saabsan Ilaalinta iyo Ka Hortaga Barakacayaasha in Dhulka (Dab Damiska, Qabuuraha iyo Dhulalka Kale) Ay Degan Yihiin Loo Bixin Si Sharci-darrada ah**

| **Magaca Xildhibaanka** | **Taariikhda** |
|---|---|
| Dr. Abdillahi Hashi Abib | 09/07/2024 |

| **Saxeexa Xildhibaanka** | **HOP #** |
|---|---|
| | 201 |

## LIISKA XILDHIBAANADA SAXEEXAY Soo-jeedin (Motion) Qaraarka ku Saabsan Ilaalinta iyo Ka Hortaga Barakacayaasha in Dhulka (Dab Damiska, Qabuuraha iyo Dhulalka Kale) Ay Degan Yihiin Loo Bixin Si Sharci-darrada ah

| Magaca Xildhibaanka | Taariikhda |
| --- | --- |
| Saxeexa Xildhibaanka | HOP # |